

KUMAAN QAADANAYN MMR?

Bixiyaha tallaalkaaga ayaa buuxin doona liiska-hubinta ee tallaalka ka hor intaan la qaadan tallaalka. Tani waxay muujinaysaa dadka qaba jirrooyinka qaarkood sida:

- Kuwa aleerjiko ama xasaasiyad ka qaba dhooskii hore ee tallaalka MMR ama qaybaha tallaalka.
- Haweenka kuwa mar hore uur lahaa ama qorshaynayey inay uur yeeshaan hal bil tallaalka ka dib.
- Cid kasta oo qabta jirro ama qaadanaysa daawada hoos u dhigta nidaamka difaaca jidhka sida cortisone ama prednisolone.
- Cid kasta oo ku xanuunsanaysa feebare wata xummad ka sarraysa 38.5C oo ah maalinta tallaalka.

WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH

- Kala hadal dhakhtarkaaga ama bixiyaha tallaalka.
- Weydii adeegga tallaalka ee dowladda hoose.
- Weydii kalkaaliyaha caafimaadka hooyada iyo ilmaha.
- Kilinikada qorshaynta qoyska waxay hayaan macluumaad.
- Better Health Channel:
www.betterhealth.vic.gov.au
- Rubella Education Nurse (Kalkaaliyaha Waxbarashada Rubeelaha), Deafness Foundation
Taleefanka (03) 9887 8683
Email rubella@deafness.org.au
Web www.deafness.org.au

TURJUMIDDA LUQADDA

Faafiskan waxaa lagu helaa luqadaha bulshada ee kale ayadoo laga helo Deafness Foundation, Ka caawinta luqadda waxaa laga heli karaa Adeegga Fasiraadda iyo Turjumidda (TIS). Wicidda Lacag La'aanta ah waa 13 14 50.

Waxaa daabacay



Deafness Foundation
(Victoria)

Deafness Foundation (Victoria)
PO Box 42, Nunawading 3131
Taleefanka 03 9887 8683 Fax 03 9887 8848
Email rubella@deafness.org.au
www.deafness.org.au

This leaflet is supported by an unrestricted grant from GlaxoSmithKline (GSK). GSK has had no input into the content of this leaflet.

April 2009

RUBELLA

SOMALI



**Xaqiiqooyin
muhiim ah
oo ku saabsan
Rubella oo
loogu talagalay
bulshada
oo dhan**



WAA MAXAY RUBELLA?

Rubella (waxaa kaloo loo yaqaan jadeecada Jarmalka) waa cudur fayras ah oo aad laysku qaadsiiyo kaas oo saamayn kara carruurta, kureyada iyo dadka waaweyn. Waa cudur ka duwan jadeecada waxaana keena fayras.

Astaamaha caanka ah ee Rubella waxaa ka mid ah xumad yar, qanjidhada oo barara, kala-goysyada oo xanuuna iyo firiirac ka soo yaaca wejiga iyo qoorta kaas oo ku dhammaada laba ama saddex maalmood. Cudurka Rubella mararka qaarkood wuxuu dhacaa asagoon lahayn wax astamo ah ama aanba lahayn astaamo.

Cudurak Rubella wuxuu u halis badan yahay marka uu haweenka ku dhaco 20ka toddobaad ee uurka u horreeya. Sidaas darteed, hooyadu waa inay ilmaha iska soo riddaa haddii kale ilmahu wuxuu dhalanayaa asagoo dhaga la', indha la', wadno xanuun qaba iyo dhimanaan xagga caqliga ah. Xaaladaas waxaa loo yaqaan Sandaroomka Rubella ee Ku-dhalashada (Congenital Rubella Syndrome – CRS).



SIDEE RUBELLA LOO FAAFIYAA?

Rubella waxaa loo faafiyaa si la mid ah sida dureyga waxaana laga qaadi karaa qufaca iyo hindhisada ka yimaada qof qaba cudurka. Astaamaha Rubella waxay badanaa qaataan laba toddobaad si ay u soo muuqdaan waxaana laga yaabaa inay dadku garan waayaan inay qaban cudurka. Inta waqtigan lagu jiro, waxaa laga yaabaa inay dadka kale qaadsiiyaan cudurka oo ay ku jiraan haweenka ku jira marxaladaha hore ee uurka kuwaas oo aan lahayn wax difaac ah. Uurka hore waa waqtiga marka ilmaha aan dhalan uu ugu halis badan yahay.

SIDEE BAAN UGA HORTAGI KARNAA RUBELLA IYO CRS?

Rubella iyo Sandaroomka Rubella ee Ku-dhalashada (CRS) waa laga hortgi karaa! Sida ugu fiican oo looga hortagi karo kala-dhimanaanta dhalashada oo ay keento Rubella waa in la hubiyaa in haweenka oo dhan lagu tallaalo tallaal ay ku jirto Rubella, badana tallaal ka jadeecada, qaamo-qashiirka iyo rubella (MMR), KAHOR uurka.

Haweenku waa inay iska ilaaliyaan uurka ilaa hal bil ka dib marka ay qaataan tallaal MMR kuwa hore uurka u lahana waa inaan la tallaal in ilaa KADIB ay dhalaan.

Baaris dhiig KAHOR uur KASTA waa muhiim si loo hubiyo in haweenku weli inay leedahay difaac kaga filan Rubella *xataa haddii la tallaalay*. Haddii baarista dhiigu ay muujiso difaac la'aan ama difaac yar dhoos MMR ah ama tallaalka Rubella ayaa la siinayaa. Baaris dhiig oo dheeraad ah ayaa la sameeyaa lix ilaa siddeed toddobaad kadib si loo hubiyo in tallaal kii uu abuuray difaac dhammaystiran.

Halkan Australia, waxaa lagu tashey in carruurta oo dhan la siiyo laba dhoos oo kala duwan oo ah tallaal MMR (jadeecada, qaamo-qashiirka iyo rubella) marka ay gaaraan da'da hal sano taas oo qayb ka ah Barnaamijka Tallaalka qaranka. Taas waxay ka ilaalinaysaa saddexda cudurba.

Carruurta iyo dadka waa weyn kuwaas oo dhashay ka dib 1965 waxaa laga yaabaa inaysan qabin difaac rubella. Haddii ay sidaas tahayna waxaa laga yaabaa inay qaadaan cudurka iyo inay qaadsiiyaan dadka kale. Inay haystaan caddayn dokumantiyo oo muujinaya inay qaateen laba dhoos oo tallaal MMR ama baarista dhiigu muujiso difaac mahee waa inay qaataan tallaal MMR. Ku tallaalidda ragga, haweenka iyo carruurta tallaal MMR waxay caawisaa inay joojiso faafinta cuduradan ee bulshada dhexdeeda.

KUMAA HALISTA UGU BADAN UGU JIRA?

Tallaalka Rubella laguma qaato barnaamijyada tallaal ka carruurnimada adduunka oo dhan. Dadka Australia u soo haajirey oo ka yimid waddamo kale waxaa laga yaabaa inaysan tallaalayn, gaar ahaan hadday Australia yimaadeen ayagoo ka weyn afar sano. Gaar ahaan, haweenka ku dhashay waddamada Asiya iyo Afrika waxaa lagu dhiirgelineyaa inay qaataan tallaalka Rubella ka hor uurkooda kowaad maaddaama aysan qabin wax difaac ah.

Ku-dhicidda cudurka rubella carruurnimada ama ka dib, damaanad difaac uma ahan inaysan kugu dhicin rubella. Baaris dhiig kahor uur kasta ayaa loo baahan yahay si loo xaqiijiyo difaac.

HALKEE TALLAALKA LAGA HELAA?

Dhakhtarkaaga degaanka, kilinikada qorshaynta qoyska, xarunta caafimaadka bulshada iyo adeegga tallaalka dowladda hoose ayaa bixiya tallaal MMR.

FALCELISYADA

Falcelisyada Tallaalka MMR aad bay uga yar yihiin dhibaatooyinka cudurka rubella ka gaysto uurka. Badanaa falcelisyada ugu badan waa dareenka xanuunka, feebaraha, jilicidda qanjidhada saracda iyo badanaa firiirac soo baxa shan ilaa laba-iyo-toban maalmood ka dib tallaalka. Dadka la tallaalay ma qaadsiiyaan dadka kale. Falcelisyada ugu xun tallaalka badanaa way yar yihiin waxayna badanaa dhacaan qiyaasta ka yar hal dhoos halkii malyanba. Halisyada iyo waxtarrada waxaa lagala hadli karaa dhakhtarkaaga.